Last updated 8/18/2025

# Su'aalaha inta badan la is waydiiyo: Adeegyada laga bixiyo maktabadda dadwaynaha ee magaalada Saint Paul, inta lagu jiro dhacdada amniga dhijitaalka ah ee so foodsaartay magaalada.

Magaalada Saint Paul waxay la tacaaleysa dhacdo amni dhanka aalada dhijitaalka ah. Aalada Internetka iyo adeegyada daabacaaddaba intaba way xadidanyihiin. Fulinta Adeegyada kale waxay qaadan karaan waqti.

**Ma heli karaa kaarka maktabadda ee jireedka ah hadda?**

- Jawaabtu waa maya. Laakiin dadka dagan magaalada Saint Paul waxay iska diiwaan gelin karaan kaarka elektarooniga ah (e-card) si ay si degdeg ah u isticmaalan agabka online-ka ah.

**Maxa sababay in aan Maktabadu aan la xirii Karin? Ama wici Karin?**

- Magaalada Saint Paul waxay la tacaalaysa xaalad amni dhanka dijitaalka ah. Taas oo sababtay in aalada internetka magaalada uu hawada kabaxo. Talefanada xarumaha maktabada ayaa hawada kamaqan arintas awgeed.
- Maktabaddu waxay macaamishu ku boorineysaa in ay la xiriiraan numberkan 651-266-7000 haday qabaan wax su'aalo ah. Jawaabaha waxay furan yihiin xiliyada shaqada ee maktabada dhexe ee magaalada Saint Paul ama George Latimer Central Library.

**Ma amaahan karaa buugaagta hadda?**

- Haa, waxaad ka amaahan kartaa goob kasta oo maktabadu xarun kuleedahay inta lagu jiro saacadaha caadiga ah. Waxaa muhiim ah in aad heysato kaarka maktabada.
- Waxaa kaloo la isticmaali karaa Libby App – kaas oo ah App-ka maktabadu ay isticmaasho.

**Maxaan u helayaa ogeysiisyo dib u dhac ah oo quseeya agabyo aan horay uso celiyay?**

- Haddii aad soo celisay agabka laakiin aad wali hesho ogeysiis, waad iska indho tiri kartaa.  Waxaa wali maqan aalada internetka. Agab cusub wad amaahan karta waadna so celin kartaa laakin, ogow, Xogtaada lams cusboonaysiin doono ilaa internetka dib loo soo celiyo.

**Goorma ayay dalabaadku (holds) iman doonaan?**

- Shaqaalaha maktabadda waxay fududeyn doonaan dalabaadka (holds) marka maktabaddu dib uhesho internetka. Magaaladu ma cayimin wakhtiga saxda ah ee internetku so labanaayo – qayb ahaan ama gebi ahaan ba.

**Goorma ayaa agabkayga la diiwaangelin doonaa?**

- Hadda Waxaa furan aqbalista agabka soo celinta bas, laakiin akoonkaaga laguma cusboonaysiin doono ilaa maktabadda dib ugu noqoto habka onlineka ah

**Goorma ayay gebi ahaan adeegyadu dib u soo noqon doonaan?**

- Lama hayo wakhti la hubo o lagu kalsoonaan karo. Magaaladu wali ma cayimin wakhtiga saxda ah ee internetku so labanaayo – qayb ahaan ama gebi ahaan ba.

**Goorma ayaan dib u heli karaa internetka?**

- Lama hayo wakhti la hubo o lagu kalsoonaan karo. Magaaladu wali ma cayimin wakhtiga saxda ah ee internetku so labanaayo – qayb ahaan ama gebi ahaan ba.

**Ma lacag ba la iga qaadi doonaa agabka Lucky Day oon horay uqaatay?**

- Maya, maktabaddu ma qaado lacag maalinle ah. Haddii lagugu so qoro lacag, waxaa dib loo sixi doonaa marka internetku dib usoo laabto.

**Ma beddeli karaa macluumaadka akoonkayga?**

- Haa, wax waad ka badali kartaa xogta akoonkaaga, laakiin qeyb ka mid ah xogtaada waxaa beddeli kara oo kaliya shaqaalaha, waxaana ku imaan karo dib udhac.

**Ma sameysan karaa dalabaad cusub (hold)?**

- Haa, waad sameysan kartaa dalabaad hor le, laakiin, ciladaha jiro awgeed, waxaa jiri kara dib u dhacyo, waxaad na heli doontaa ogeysiis marka uu diyaar noqdo dalabkaaga.

**Goorma ayaan so celin karaa agabka?**

- Inta badan agabku si toos ah ayaa loo cusboonaysiiyaa ilaa saddex jeer. Haddii agab aad horay uqaadatay aan la cusboonaysiin karin, fadlan soo celi sida caadiga ah.

**Wa gormee waqtiga so celinta kama dambaysta ah?**

- Waqtiga so celintu wu cayiman yahay, lamana cusboonaysiin karo. Waxaad heli doontaa xasuusin inta aan lagaarin xiligaas, si aad usoo celiso. Haddii agab aad horay uqaadatay aan la cusboonaysiin karin, fadlan soo celi sida caadiga ah.

- Agabka la amaahday inta maktabaddu hawada ka maqantahy, waxaa lasocda  taariikh kama dambays ah oo ku qoran warqadda. Waxaana dib looga xusi doonaa xogtaada marka internetku so laabto.

**Maxaan ka sameyn karaa gudaha  maktabadda inta arintan lagu jiro?**

- Maktabadaha magaalada Saint Paul  way furan yihiin inkastoo adeegyada qaar aysan shaqeynayn xaaladaha dhanka amniga dijitaalka awgood. Waxaad amaahan kartaa ama aad  soo celin kartaa agabyada, waxaana  ka qayb geli kartaa barnaamijyada. Waxaa kaloo dadwaynaha u furan isticmaalka qolalka shirarka iyo waxbarashada.

**Arintani wax saameyn maku yeelatay xogteyda ama macluumaadkeyga shaqsi ahaan?**

- Haddadan lajoogo, ma jiraan wax cadeynaya in xogta dadwaynaha la xaday.

**Libby ma saameyn doontaa?**

- Maya, Libby iyo agabka online-ka wax saameyn ah ma so gaarin.